Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 8-aad
Documentiga Kalfadhiga 8-aad kulankiisa:8-aad Tr: 04.05.2016

Kalfadhiga 8-aad

Kulankiisa: 8-aad, sacada furitaanka.12:05 gh, sacada xiritanka.2:30 gd

Guntinta: 153 xildhibaan

Ajendaha:-

1.Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka

2.Sii wadida ka wada hadlida soo jeedinta Xukuumadda Federaalka oo u abaaran Nidaamka Geedi socodka Doorashada Qaranka 2016.

3.Qeybin soo jeedin dhameystirka matalaada ka maqan Golaha Shacabka.

Shir-Guddoomiye, Guddoomiye ku xigeenka 2aad Golaha Shacabka Jamhuuriyadda F.S.

Mudane:Mahad Cabdalla Cawad.

1.Waxaa shirka Furay Guddoomiye ku xigeenka 2aad Golaha Shacabka J.Federaalka Soomaaliya Mudane:Mahad Cabdalla Cawad,waxaa lagu furay Aayadaha Qur'aanka kariimka uu akhriyay xildhibaan:Sheekh Shaacir.

2.Guddoomiye ku xigeenka 2aad Golaha Shacabka Mudane:Mahad Cabdalle Cawad,wuxuu soo jeediyay, doodii halkeedii ayay ka sii soconeysaa.

Xildhibaan:Shariif Maxamed Cabdalle,wuxuu soo jeediyay,doorashadan maaha mid waqti dheer u baahan ee waa mid kooban oo dad kooban wax dooranayaan meel cayimana lagu qabanayo, hadii la dhaho fasax 2 bilood hala galo, waxaa loo baahanayaa dhaqaale iyo amaan sugan in la helo xildhibaanka aadaya gobolkiisa taas waxan dhihi lahaa 15 maalmood halagu soo kobo, boga 9aad ee warqada xukuumada,waxaa ku qoran in bisha septembar ay guddiga

doorashooyinka ay soo diyaarin karto iyadoo ay awal ahayd Agoosto sidaa daraadeed xukuumadda yaaney waqtigii loo balansanaa yay ka boodin ee hala timado waqtigii leysku ogaa.

Xildhibaan:Maryan Cariif Qaasim,waxay sheegtay, manta waxay ka mid tahay maalmaha ugu cul culus ee uu soo marray Baarlamaanka, waxaan soo marnay qilaafyo badan oo dalka horay u soo maray mantana waa in isku duubni muujinaa si aan ugu gudubno xaaladan adag Baarlamaanka waxaa waajib ku ah inuu eego shuruucda qoraalka Rai'salwasaaraha uu soo gudbiyay wuxuu ka soo horjeedaa Qodobada.60 iyo 64,sidoo kale qoraalka wuxuu ka soo horjeedaa Qod.70 aad ee Dastuurka, ugu danbeyn xildhibaanada waxaan ka codsanayaa in Baarlamaanka 10 aad in aan ka fekerno qaabka loo soo xuli lahaa.

Xildhibaan:Xasan Ducaale,wuxuu soo jeediyay,waxan ku raac sanahay labadii xildhibaan ee iga horeyay, waa in la taariikheeyo waqtiga xukuumadda ee doorashada iyo in guddi doorashada la howl galiyo.

Xildhibaan:Cabdi C/laahi Maxamed,wuxuu sheegay,qoraalka xukuumada waxaa ku jira waxyaabo Dastuurka ka soo horjeeda iyo handadaad qofkii ka horyimaado qoraalka in loo arki doono qas wade sidaa daraadeed waxaan ku soo kooba in taariikhda waqtiga doorashada lagu cadeeyo qoraal.

Xildhibaan:Barre Ugaas,wuxuu soo jeediyay,waxaa ka maqan wax yar Dastuurkana waa qilaafsan yahay, Dastuurka kuma hagaagsano ee wuu qariban yahay in guddi loo saaro,waxaa la yiri qofkii 50 oday ha soo doorato oo beesha ah cod ha siiyeene dadkaas badan yaa keenaya halkeena lagu ururinayaa, sidaa daraadeed sidii hore haloo dayo oday dhaqmeedka beesha,waxaan taageerayaa in taariikhda lagu cadeeyo qoraalka guddiga howsha doorashada qabanaya.

Xildhibaan:Samaan Maxamed Sheekh Daahir,wuxuu soo jeediyay,waxaan ku raacsanahay, maryan cariif,waxaan ku darayaa hadii aas aaska naga halabo waxba manoo toosayan, hadaba waa in Dastuurka aan leenahay ha lagu dhaqmo, waayo aqalka sare waxaa Dastuurka ugu qoran in 18 gobol dalka loo qeybiyo min 3 xubnood, hadana qoraalka Rai'sal wasaaraha wuxuu ku yimid in 6 da maamul goboleed laga keeno xubnaha min 8 xubnood, isla markaana puntland iyo Soomaali land min 3 xubnood loogu kordhiyo, arrintaas sharciga iyo Dastuurka waa qilaafsan tahay,teeda kale beesha caalamka hana taakuleyso laakiin siyaasadeena ha noo dhaafto.

Xildhibaan:Mustaf Mayow,wuxuu sheegay,dhaliilaha waxaa ka mid ah,waxaan waa faqsaneyn Dastuurka oo ka hor imanayo qodobo muhiim ah ayaa ku jira oo waa faqsan Dastuurka.

Xildhibaan:Siciid Maxamed Cali,wuxuu soo jeediyay,Qoraalkan waa qorshe la soo diyaariyay iyadoo nalooga dhigayo in uu sharciga waafaqsan yahay laakiin waa qoraal wada qilaafsan Dastuurka iyo sharuucda dalka marka waxaan soo jeedinayaa in dib loogu celiyo ama in guddi loo xilsaaro oo ka soo baarandaga qodobada in uu ka hor imanayo qoraalkan**.**

Xildhibaan: Kulalihi,wuxuu sheegay, wadankan anaga uma talino qibrado badan ayaan soo marnay sida Kampala accord waxaan ognahay in dibada nalaga xukumo, qaabka doorashada u dhaceyso iyo cida maamuleyso anagaa nagala rabaa inaan keeno, yaa lacagaha lagu maal galinaya odoyaasha leysu keenayo yaa heynaya, waxaan cadeynayaa in maamul gobolleedyada aysan la imaan doonin musuq, nin jecleysi,lacagtan shirarka lagu galayo yaa gacanta ku heynaya,sidaa daadeed waxaan soo jeedinayaa in guddi loo xilsaaro, teeda kale waa in Dastuurka wax laga bedelaa doorashada waa in aan ka dhiganaa bisha November in aan usoo istaagno doorasho bisha Dec na waa inaan doorano Madaxweynaha.

Xildhibaan:C/laahi Axmed Coonka,wuxuu soo jeediyay,Xukuumada wey mahadsantahay shaqo wanaagsan wey soo qabatay laakiin waa qabyo waxaana lagu xad gudbay qodobada 60 aad, 64 aad,70 aad, 72 aad, waa inay noo cadeeyan inay ayaga wax soo dhameystirayan, waxaan soo jeedinayaa guddoonka in uu noo cadeeyo cidii soo dhameystiri laheyd.

Xildhibaan:Sheekh Aadan Madoobe,wuxuu sheegay,diyaar wan nahay in aan u dareerno doorasho, qoraalka bogiisa 9aad waxaa ku qoran guddiga doorashooyinka waxay dib u eegayan ergooyinka bisha septamber, anaga ku tala galkeena wuxuu ahaa in Agoosto Baarlamaan cusub xilkiisa la wareego, haddaba ma cada qoraalkan waa in xukuumada ay soo cadeyso doorashadii Agoosto,maxaa geyay Septembre iyo wixii ka dambeeya.

Xildhibaan:Mustaf Muqtaar,wuxuu soo jeediyay,sidey ila tahay wali anaga nooma furna dood haday xukuumad ka soo shaqeysay iyo haday maamul goboeed ka soo shaqeyanba, waxan xildhibaanada u soo jeedinaya,in xukuumada lagu celiyo qoraalkeeda wixii Dastuurka ka soo horjeeda hadii lagama maarman ay noqoto oo ay ka maarmi weyso xukuumadda soo codsato in qodobadaas lagu sameeyo wax ka bedel.

Xildhibaan:Cali Ganey,wuxuu sheegay,Barnaamijka ay soo gudbisay xukuumada in la celiyo ma qabo waxaa la yiri waxa la dhisaa waxaa loo qeybinaa waqooyi iyo koonfur maamul goboleed awoodiisa wali lama ansixin waxan qabaa in guddi loo saaro.

Xildhibaan:C/raxmaan ibi,wuxuu soo jeediyay,Dalkeena Dastuur ayuu leeyahay qabyo ha noo ahaadee waa in aan ilaashanaa Dastuurkeena, Baarlamaan waa jiraa waana jirayaa hadan la qaadan sida Qod.62, iyo 74, wixii la rabo ayaa leyska yiri qodobadaas la jibiyay ayaa dambi ah Baarlamaanka lama kala diri karo waa in aan is aamino waqti buu leeyahay waa in aan ilaalino qayimka iyo sharafteena.

Xildhibaan:Naciima,waxay sheegtay, waxaan qabaa ra'yigii xildhibaanada iga horeyay oo ah in guddi loo saaro oo nooga soo shaqeya qodobada lagu xad gudbay.

Xildhibaan:Jawaahir Axmed Cilmi,waxay soo jeedisay,Qoraalka Rai'salwasaaraha wuxuu ku saleysnaa Hiigsiga taasna kuma cada maqaamka caasimadda(Muqdisho) haddaba si shuruucda loo ilaaliyo waa in guddi loo xilsaaraa oo Dastuurka waafajiya.

Xildhibaan:Aweys C/laahi,wuxuu sheegay,maadama aanwada qirnay in qodobo Dastuuri ah lagu xad gudbay,waxaan qabaa in qoraalka lagu celiyo meesha uu ka yimid,waa inaan ilaalina sharafta Baarlamaanka.

Xildhibaan:Daahir Aamiin Jeesow,wuxuu soo jeediyay,Qoraalkakan waxaa soo qoray IGAD boga 3aad waxaa ku qoran qaswade yaal cidii ka hortimaado qoraalkan, qas wade waa iyaga wax shaqo ay nagu leeyihiin majirto sharafteena anagaa iskaleh maka yeeleyno anagoo u daneynayno dalka iyo dadka iyo diinta,sida aad ogtihiin bisha 17 keeda waxa imanaya dowlada IGAD, hadaba waxaa la jabiyay qodob Dastuuri ah,waa in aan qoraalkan ka soo dhigno Hindise Sharciyeed,waa inaan meel u fadhiisanaa weyna ka qoomameynayan inta jibisay qodobka Dastuurka, waxna waan ka dhimi karnaa,waxna waa ku dari karnaa waa in guddi farsamo loo saaro.

Xildhibaan:Geesay,wuxuu sheegay, waxaan meshan u fadhina inaan ilaalino danta Qaranka, shacabka warqadan uu Rai'salwasaaraha uu keenay halmeel kama waafaqsana howd in ay nagu wadaan guddoonka ayay ila tahay Madaxweynaha wuxuu ku qudbiyay xaq umalihin in aan ku doodno, waxan xaq uleenahay in aan ku doodno Dastuurka, qodobo badan ayay ka hortimid waxayna ka tarjumeysa fadhigiina meelo ay ka waa faqsan tahayna ma jirto,waxan qabaa in waqtigii loogu talagalay doorashada la qabto, aqalka sare ee ay soo qoreen Dastuurka kuma qotomo, nabadgalyada kuma qotomo,wadada aan taaganahay waa in aan ku soconaa.

Xildhibaan:Khadiijo Maxamed Diiriye, point of order,waxay soo jeedisay,arrin deg deg ah in Guddoomiyihii Maxkamada sare Ceydiid ilka xanaf ayaa Dekrato xilka looga qaaday taasna waxay sahleysaa in Dekrato looga qaado Baarlamaanka marka waa in aan ka hor tagnaa.

Xildhibaan:Maxamed C/laahi Fadhaye, wuxuu sheegay,Qoraalkan wuxuu ku cad yahay in loo noqday 4.5 iyo 135tii oday,Baarlamaanka wuxuu ku egyahay 20 Agoosto hadii aan la helin Baarlamaan cusub Dastuurkana waqtigaas ayuu ku egyahay maalina lagu dari mayo, wixii adinka aad soo dajisaan ayaa soconaya anaga guddi sameysan meyno guddoonka ayaan u dhiibaynaa.

Xildhibaan:Maxamuud Maxmed Guure,wuxuu soo jeediyay,Guddoomiye Jawaari,wuxuu sheegay wixii qilaafsan Dastuurka in la waafajiyo haloo saaro guddi soo dhirin dhiriya, bishii

Septambr waxaa la magacabey guddi waxaa laga soo saaray 3 qodob inaysan dhici Karin doorasho hal qof hal cod ah,waxaa leysla doortay in la qabto mid dadban waa in la doorto guddi 3maalmood ah ilaa isniinta,waa in la sameeyo sharci ogolanaya in la qabto doorasho dadban iyo waqtiga in xukuumada la weydiiyo in la keeno isku dhaf waa in aan ansixino sharciga doorashada dadban aan isku raacno qodobadaas aan magacowno ugu dambeyn arbacada ayagana ay inoo keenan maalinta isniinta.

Kalfadhiga 8-aad Kulankiisa:8-aad, uu shir Guddoominayay, Guddoomiye ku xigeenka 2aad Golaha Shacabka Mudane:Mahad Cabdalla Cawad uu sheegay in uu shirka xiran yahay sacada markey ahayd 2:30 gd.